

IDRS Infectious Disease Reporting System

Disease Reporting 24 Hours a Day Columbus Public Health and Franklin County Public Health

SUNTA-SHIGA EE SOO KEENTA E. COLI (STEC)

E. Coli 0157:H7 waa mid ka mid ah boqolaal noocyada bakteeriyaha Escherichia coli. Inkastoo inta badan noocyada yahiin kuwo aan dhibaato lahayn kuna nool mindhicirka aadanaha caafimaadka qaba iyo xoolaha, noocyada qaar waxay soo saaraan maleeg xoog badan (sun) waxayna sabab u noqon karaan cudur darran. Noocyadaan waxaa lagu magacaabaa sunta-shiga ee soo keenta E. coli (STEC).

Calaamadaha

Calaamadaha waxay soo bixi karaan inta u dhexeyso 10 saac ilaa 8 maalin kaddib marka qofka uu qaado, hase ahaatee waxay u badan tahay inta u dhexeyso 3-4 maalin

- Shubanka (badanaa waxaa la socda dhiig) iyo majuuqinta caloosha
- Xoogaa qandho ah (inta badan ma laha qandho)
- Dadka waxay qaadi karaan bakteeriyaha muddo dhowr maalin ama todobaad kaddib marka ay soo roonaadaan.
- Marar dhif ah, cudurka wuxuu kaloo sabab u noqon karaa dhibaataada lagu magacaabo calaamadda "uremic" (HUS), halkaas ay ku burburaan unugyada dhiigga iyo kilyaha oo joojiya shaqdooda. Calaamadaha HUS, sida dhiig yarida midabka cad iyo kaadi yarida marka la barbar dhigo caadiga, waxay bilowdaan dhowr todobaad, shubanka kaddib.

Gudbinta

- Hilibka shiidan aan sida wanaagsan loo karinin waa ilaha ugu badan ee laga qaado cudurka. Xattaa hal dhibic dhacaanka hilibka ceyriinka ayaa ku fillan in aad ka qaadid cudurka, wuxuu wasakhyn karaa raashin kasta, saxuunta cuntada, ama alaabta cuntada uu soo gaaro.
- Sidoo kale, caanaha waxay noqon karaan kuwo ay soo gaarto wasakhda haddii aan laga dillin bakteeriyaha.
- Sidoo kale, biyaha waxaa la socon kaara bakteeriyaha, khaas ahaan biyaha ceelka ama biyaha aan la nadiifin ee laga keeno balliyada ama killiyada. Aadanaha wuu ku xanuunsan karaan marka uu cabbo ama marka uu si lama filaan ah u liqo biyo inta uu ku jiro dabaal.
- E. coli wuxuu kaloo ku faafi karaa qof ilaa qof marka gacmaha, meelaha fidsan, ama shayga soo gaaro wasakhda saxarada (xaarka) qof qaba cudurka. Goor dambe, waxaa dhici karto in dad kale ay taabtaan waxyaabahaan kaddibna iyaga oo aan ogeyn in ay bakteeriyaha u gudbiyaan afkooda ama cuntada.

Daweynta

- Shaybaarada qaar waxay baari karaan bakteeriyaha STEC marka ay baaraan cadka saxarada (xaarka).
- Inta badan dadka waxay bogsadaan daawo la'aan muddo 5-10 maalin. Takhtarka ayaa go'aan ka gaara haddii loo baahan yahay in qofka xanuunsan uu qaato antibiyootiko. Waxaa dhici karto in antibiyootikada daahiso cudurka iyo waxay sida suurtoogalka ah u keeni kartaa dhibaato.
- Cab dareere badan si aad uga hortagtid biyo baxa (luminta dareeraha). Ha isticmaalin daawada ka soo horjeeda shubanka. Kuwaan waxay cudurka gaarsiin karaan muddo dheer.
- Haddii qofka qaado HUS, wuxuu u baahan yahay daryeelka isbitaalka, iyo sida suurtoogalka ah wuxuu u baahan karaa in lagu shubo dhiig iyo in laga nadiifiyo killida.

Ka Hortagga

- Waa in la kariyo hilibka shiidan ilaa heerkulbeegga lagu suro gudaha qeybta buuran hilibka, ka muujiyo ugu yaraan 160° F. Haddii aadan haysanin heerkulbeeg, hubso in hilibka leeyahay midabka dambasta ama yahay maroon ilaa gudaha.
- Si wanaagsan isaga dhaq gacmaha adiga oo isticmaala saabuun iyo biyo qandac ah kaddib marka aad tagtid musqusha ama marka aad baddashid xafaayadda, ka hor inta aadan diyaarinin ama cunin raashin, iyo kaddib marka aad la xariitid xoolo ama meelaha xoolaha ku nool yahiin.
- Nadiifi dhamaan alaabta cuntada iyo meelaha fidsan, kaddib marka la taabsiiyo hilibka ceyriinka. Waa in aad hilibka ceyriinka ka soocdid raashinka ceyriinka.
- Cab caanaha laga dillay bakteeriyaha keliya. Cun waxyaabaha laga sameeyo caanaha (sida formaajada) ee laga dillay bakteeriyaha.
- Iska ilaali in aad liqidid biyo marka aad dabaalaneysid ama marka aad ku cayaareysid balliyada, killiyada, balliyada dabaasha, iyo balliyada "caruurta."

Dadka qaba STEC ee taga xarunta xanaanada cunugga ama ka shaqeyaa adeegga raashinka, daryeelka bukaanka, ama xanaanada cunugga waa in ay joogaan xariga ilaa shubanka ka dhamaado. Sharciga Ohio wuxuu rabaa in ay bixiyaan labo cad saxara aan lahayn STEC ka hor inta aysan ku noqonin shaqada ama xanaanada cunugga.

Dhamaan macluumaadka waa guud mana loogu talogalin in loo isticmaalo in lagu baddalo waanada qofka aqoonta leh.



c/o Franklin County Public Health, 280 East Broad Street, Columbus, Ohio 43215-4562

Call: (614) 525-8888 • After Hours: (614) 525-3965 • Fax: (614) 525-8890

Email: idsr@franklincountyohio.gov • Web: www.idrsinfo.org



COLUMBUS
PUBLIC HEALTH